Carshaka 17

1. Maxaa dhacay markii wiilahsii faracii Seet ay bilaabeen inay guursadaan gabdhihii faracii Qaabiil?
-Dad aad iyo aad u badan ayaan doonayn inay Ilaah maqlaan.
-Dad aad iyo aad u badan ayaa waxay maqlayeen codka Shayddaanka.

2. Ilaah wuxuu yiri waxaam dadka la hadlayey boqol iyo labaatan sannadood, oo haddii ay weli diiddan yihiin inay raacaan ilaah, maxaa Ilaah samayn doonaa?
-Ilaah wuxuu ku ciqaabayaa dhimasho.

3. Sidee buu Ilaah ula hadlayey dadka?
-Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah wuxuu la hadlayey maanka dadka.

4. Maxaa Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah ku lahaa dadka?
-Maqla Ilaah, laakiin ha maqlina Shayddaanka.
-Waa inaad raacdaan dariiqyada Ilaah, laakiin waa inaydaan raacin dariiqyadiinna.

5. Maxaa lagu masaali karaa dadkii wakhtigii Nuux?
-Waxay ahaayeen dad hunguri weyn oo keli-cunayaal ah.
-Waxay ahaayeen niman dulli ah oo shar badan.
-Ma aanay doonayn inay ku socdaan dariiqa Ilaah.
-Waxay doonayeen jidkooda.

6. Miyaa ilaah arkay dembiga dadka?
-Haa, ilaah wuxuu arkay dembigooda.

7. Maaddaama dhulka uu ka buuxsamay dembi, maxaa Ilaah go'aansaday inuu sameeyo?



-Wuxuu go'aansaday inuu baabi'iyo wax kasta oo nool ee dhulka jooga.

8. Maxaa Ilaah Ilaah u go'aansaday inuu badbaadiyo Nuux?
-Nuux wuxuu garanayey inuu dembi ku dhashay.
-Nuux wuxuu garanayey inuu Ilaah ku dembaabay.
-Nuux wuxuu garanayey in Ilaah dembiga ku ciqaabo dhimasho.
-Nuux wuxuu garanayey in Ilaah awoodo inuu isaga badbaadiyo.
-Nuux wuxuu kaloo garanayey in Ilaah soo dirayo Badbaadiyaha si uu uga soo furto dembiyadiisa.

9. Maxaa Ilaah ku amray Nuux inuu sameeyo?
-Inuu doonni dhiso.

10. Miyaa Ilaah doonayey in Nuux doonnida u sameeyo sida nuux doonayo?
-Maya.

11. Sidee buu Ilaah doonayey in Nuux doonnida u dhiso?
-Sidii Amarka Rabbigu ahaa.

12. Ilaa iyo imisa doon ayaa nuux dhisayey?
-Hal doon oo keliya.

13. Ilaa iyo imisa albaab ayuu Ilaah ku amray in doonnida loo yeelo?
-Hal albaab.

14. Inkastoo qof dunida ku nool aanu roob arag wakhtiga nuux doonnida samaynayo ka hor, maxaa Nuux rumaystay?
-In Ilaah daad soo diri doono.

15. Muxuu Nuux sameeyey markii uu doonnida dhisayey?
-Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu daad soo dirayo si dadkii aan rumaysan Isaga oo dhan uu u wada baabi'iyo.

-Miyaa Ilaah illoobay inuu sameeyo wixii uu horey u yiri, Wuu samaynayaa?
-Maya.
-Myaa Ilaah ,ar wa;oba sa,eeuaa woxoo ii uoraajdp waam sa, aumauaa?
-Haa.

-Waxaa halkan yaalla tusaale:

-Maalin, ayaa waxaa suuragal ah in cunuggaagu koob ama dheri kaa jebiyo.

-Adigana aad u carootid dhallaankaaga.

-Waxaad ku oranaysaa wiilka, Dheriga aad jebisay awgii baan kuu ciqaabayaa hadhow.'

-Ugu dambaystiina, waxaad illoobaysaa inaad ciqaabto dhallaankaaga.

-Waxaad kaloo illoobaysaa in wiilkaagii jebiyey dherigii cidda.

-Laakiin Ilaah maahan sida dadka oo kale.
-Dadku wax bay illoobaan, laakiin Ilaah waxba ma illoobo.

-Ilaah wuxuu Aadan ku yiri wuu dhimanayaa haddii uu cuno miraha geedka.



-Miyaa Aadan dhintay markii uu cunay miraha?
-Haa.

-Miyaa Ilaah illoobay wixii uu u sheegay Aadan?
-Maya.

-Miyaanu Ilaah samaynin wixii uu yiraahdo Wuu samaynayaa?
-Haa.

-Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawo ka eryey Beer Ceeden.
-Ilaah maahan sida dadk oo kale.

-Ilaah weligii ma illoobo inuu sameeyo wixii uu yiraahdo waan samaynayaa.

-Ilaah ma illoobo inuu sameeyo wixii uu yiraahdo wuu samayn doonaa.

-Ilaah ma illoobo dembiga.
-Ilaah ma illoobo inuu dembiyada ciqaabo.

-Ilaah wuxuu ciqaabaa dembi kasta.
-Ilaah wuxuu dembi kasta ku ciqaabaa dhimasho.
-Ilaah wuxuu doonayaa in dadku rumaystaan isaga.

-Ilaa iyo imisa ayaa Ilaah dhowrayey inay dadkii noolaa wakhtigii Nuux rumaystaan Isaga?

-120 sanndood.

-Marka Ilaah sugayey dadka inay Ilaah rumaystaan, miyaa caradiisii uu iyaga u qabay hoos u dhacday?

-Maya.

-Maaddaama ilaah sugayey in dadku rumaystaan Isaga, caradiisa uu u qabay dembiyadiisa sare ayey u kacday.

-Ilaah carada uu dembiga u qabo sare ayey u kacdaa.

-Carada Ilaah dembiga u qabo sare ayey u socotaa ilaa laga soo gaaro wakhtiga uu dembiga ciqaabayo.

-Maxaa Ilaah Nuux ku yiri kaddib markii uu dhammeeyey shuqulkii doonnida?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 7:1-4

1-Oo Rabbigu wuxuu Nuux ku yidhi, Adiga iyo dadka gurigaaguba soo gala doonida; waayo, waxaan arkay adigoo qarnigan xaq ku ah hortayda.
2-Xoolaha daahirka ah toddoba iyo toddoba ka qaad, ku lab iyo dhaddiggiis;
3-Haadda hawadana toddoba iyo toddoba ka qaad, lab iyo dhaddig; si farcan ugu soo noolaado dhulka udshiisa ood han.
4-Waayo, waxaa weli hadhay toddoba maalmood, dabadeedna afartan m aalmood iyo afartan habeen ayaan roob ku soo dayn dhulka, oo wax kasta oo nool oo aan sameeyey waan ka baabi'in doonaa dhulka dushiisa.

-Kaddib markii Nuux dhammeeyey shuqulkii doonnida, Maxaa Ilaah u sheegay Nuux inuu sameeyo?

-Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu soo wato qoyskiisa oo uu soo galo doonnida.



-Ilaah wuxuu kaloo u sheegay Nuux inuu xayawaankana soo geliyo doonnida.

-Waxaa la soo gaaray wakhtigii ilaah baabi'in lahaa dadka.

-Waa maxay sababta Ilaah u doonayo inuu dadka baabi'iyo?

-Dadku ma ayan rumaysnayn inay dembiilayaal yihiin.
-Dadku ma ayan rumaysnayn in dembigoodu u qalmay dhimashada daa'inka ah.

-Dadku ma ayan rumaysnayn ballankii Ilaah ee ahaa inuu Badbaadiye soo diri doono.

-Ilaah wuxuu sugayey iyaga 120 sannadood si bal ay kaga soo noqdaan dariiqyadooda, oo u yimaadaan dariiqyada Ilaah.

-Balse dadku waxay doonayeen oo qura dariiqyadooda.

-Ilaahna wuxuu sugayey 120 sannadood.
-Ilaah wahti kale siima dhowri doono.

-Waxaa la soo gaaray wakhtigii Ilaah ciqaabi lahaa dadka.
-Maanta, Ilaah weli waa sidiisii.

-Ilaah wuxuu dhowrayaa in dadku ka soo noqdaan dariiqyadooda, oo raacaan dariiqa Rabbiga.

-Maalin baa imanaya, marka Ilaah aanu iyaga sugi doonin.
-Maalin baa imanaya, marka Ilaah ciqaabi doono dadka oo dhan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 7:7-11

7-Nuuxna doonniduu galay, isagii iyo wiilashiisii iyo naagtiisii, iyo naagihii wiilashiisii ee la jiray oo dhan, waxayna ka soo galeen biyihii daadka.

8-Xoolihii daahirka ahaa, iyo xoolihii aan daahirka ahayn, iyo haaddii iyo wax kasta oo dhulka gurguurtaba.

9-Nuux bay laba laba ugu galeen doonnidii; lab iyo dhaddig, sidii Ilaah ugu amray Nuux.

10-Waxaana dhacday, in toddobadii maalmood dabadeed, ay biyihii daadka ahaa dhulka dul joogeen.

11-Sannaddii uu Nuux lix boqol oo sannadood jiray , bisheedii labaad maalintii toddoba iyo tobnaad oo bisha, isla maalintaas ayaa ilihii moolka weyn biyo ka buqdeen, dariishadihii samadana la furay.

-Sidee baa xayawaanka oo dhan ay u galeen doonnida?
-Waxay ka galeen illinka oo keliya.

-Sidee bay xayawaanka oo dhan ku galeen doonnida?
-Waxay ka galeen albaabka keliya.

-Kani waa albaabka keliya ee lagu badbaado.
-Kani waa Albaabka keliya ee ciqaabta looga badbaado

-Miyaa Ilaah ku badbaadiyey Nuux iyadoo ay ugu wacnayd inuu nin wanaagsan ahaa?
-Maya.

-Ilaah wuxuu badbaadiyey Nuux waayo wuxuu rumaystay inuu badbaaday.

-Ilaah nuxuub adbaadiyey Nuux waayo wuxuu rumaystay in



dmebigiisu istaahilay dhimashada daa'imka ah.

-Ilaah wuxuu Badbaadiyey Nuux waayo Nuux wuxuu rumaystay in Ilaah oo keliya uu badbaadin karay .

-Ilaah wuxuu badbaadiyey Nuux waayo Nuux wuxuu rumaysnaa ballankii Ilaah ee uu Badbaadiyaha ku soo dirayey.

-Maxaa dhacay kaddib markii nuux iyo qooyskiisii uiyo xayawaankii oo dhan ay galeen doonnida?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 7:16b

16-Oo Ilaah waa ku xidhay isagii.

-Kaddib markii Nuux iyo qoyskiisa iyo xayawaankii oo dhan galeen doonnida, maxaa Ilaah sameeyey?

-Ilaah wuxuu xiray albaabka?

-Maxay ahayd sababtii Ilaah u xiray albaabka?

-Si kuwa gudaha ku jira ay u badbaadaan.
-Si kuwa dibadda jiraana ayan u soo gelin, laakiin ay u dhintaan.

-Haddii dadka dibadda jiraa ay barooran lahaayeen, miyaa Nuux awoodayaa inuu iridda doonnida furo?
-Maya.

-Muxuusan uga furayn?
-Waayo Ilaah baa xiray albaabka.

-Markii Ilaah Aadan iyo Xaawo ka eryey Beer Ceeden, Miyey awoodeen inay dib ugu soo noqdaan?
-Maya.

-Maxay ugu soo noqon waayeen.

-Waxay ugu soo noqon waayeen Ilaah baa ka xiray iyaga oo wuxuu dhigay albaabka Beerta laga soo galo malag iyo seef ololaysa.

-Miyaa qofi ka baxsan karaa ciqaabta Rabbiga.
-Maya.

-Markii Ilaah go'aansado inuu ciqaabo dadka, ninna baxsan maayo.

Kaddib markii Ilaah xiray albaabka doonnida, ayuu wuxuu soo diray roob.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 7:17-20

17-Daadkiina afartan maalmood buu dhulka dul joogay; biyihiina way sii kordheen, oo doonnidii bay kor u qaadeen, oo waxaa iyadoii kor looga qaaday dhulka.
18-Biyihiina way xoogaysteen, oo dhulakay aad ugu kordheen doonnidiina waxay dul socotay biyihii.
19-Biyihiina aad bay ugu xoogaysteen dhulka; oo dhamman Buurihii dhaadheeraa oo samada oo dhan ka hooseeyey way qarsoomeen.
20-Sahn iyo toban dhudhun baa biyihii xagga sare xoog ugu kaceen; buurihiina way qarsoomeen.

-Sidee buu Ilaah uga dhigay in dhulka oo dhamu ay biyo



daboolaan?

-Bilowgii, Ilaah wuxuu kala soocay biyihii.

-Ilaah wuxuu qaar ka mid ah ku dhaafay dhulka, qaarna wuxuu geeyey, cirka.

-Haddaba si biyo ku daboolaan dhulka, Ilaah wuxuu soo daayey biyihii uu kolkii hore ee uu dunida abuurayey geeyey cirka, oo waxay u soo da'een sida roob oo kale.

-Miyaa dadkii waagaas garanayeen waxa roob yahay?
-Maya.

-Inkastoo dadku aanay arag roob, haddana Ilaah wuxuu ka dhigay in roobku do'o 40 maalmood.

-Dhulka oo dhan waxaa daboolay biyo.

-Weliba buuraha iyo geedihii dhaadheeraa ayaa waxaa qariyey biyo.

-Ilaah wax waliba wuu samayn karaa.

-Wax aan Ilaah u suuroobinu ma jiraan.
-Ilaah kelidii ayaa awood oo dhan u sugnaatay.

-Maxaa ku dhacaykuwii dibadda ka jiray doonnida?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 7:21-23

21-Oo wax kasta oo jdih leh oo dhulka ku dul

dhaqdhaqaaqaaba way dhinteen, haaddii, iyo xoolihii, iyo dugaaggii, iyo wax kasta ood hulka gurguurta, iyo dadkii oo dhanba.

22-Wax walba oo dhulka engegan joogay oo dulalka sankiisa ay neefta ruuxa nolosha ku jirtay, way wada dhinteen.

23-Waxaa la wada baabi'iyey wixii dhulka dushiisa ku noolaa ood han, xataa dadkii, yo xoolihii, iyo wixiig urguuran jiray, iyo haaddii cirka; kulli waa laga wada baabi'iyey dhulka; oo waxaa hadhay Nuux oo keliya, iyo kuwii doonnidii kula jiray isagii.

-Maxaa ku dhacay xayawaankii dibadda ka joogay doonnida?
-Iyaga oo dhan way dhinteen.

-Maxaa ku dhacay dadkii dibadda ka joogay doonnida/
-Iyaga oo dhan way wada dhinteen.

-Badanaa dadka maanta ma rumaysna inay dembiileyaal yihiin.

-Badanaa dadka maanta ma rumaysna in dembigoodu istaahilo dhimashada daa'imka ah.

-Badanaa dadka maanta ma rumaysna in Ilaah oo keliya wax badbaadiyo.

-Badanaa dadku ma rumaysna ballakiin Ilaah ee ahaa inuu BAdbaadiye soo dirayo.

-Badanaa dadka maanta waxay malqaan Shayddaanka, laakiin ilaah ma maqlaan.

-Badanaa dadka maanta waay jecel yihiin dembiga.



-Ma waxaad la mid tahay sida dadka, mise waxaad tahay sidii Nuux?

-Miyaa mid ka mid ah kuwii doonnida ku jiray la badbaadiyey?
-Maya.

-Ilaah wuuu dadkii badnaa ee aan doonta soo gelin u sheegay inay dhimanayaan.

-Ilaah wuxuu mar waliba sameeyaa waxa uu yiraahdo wuu Samaynayaa.

-Maxaa Ilaah sameeyey markii dadkii aan doonnida soo gelin ay wada baaba'een?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 8:1-4 & 14-19

1-Oo Ilaah wuxuu xusuustay nuux, iyo wixii noolaa, iyo xoolihii doonnidii kula jiray isagii oo dhan; oo Ilaah dabayl buu dhulka dul mariyey, biyihiina way dhinmeen;

2-Ilihii moolka iyo dariishadihii samaduna way awdmeen; roobkii samadana waa la joojiyey;

3-Biyihiina had iyo goorba dhulkay ka noqonayeen, oo boqlol iyo konton maalmood dabadood ayaa biyihii dhinmeen.

4-Oo bishii toddobaad, maalinteedii toddoba iyo tobnaad, ayay doonnidii ku fadhiisatay buuraha Araarat.

14-Oo bishii labaad, maalinteedii toddoba iyo labaatanaad, ayaa dhulka engegay.

15-Ilaahna Nuux buu la hadlay, isagoo leh.

16-Doonnida ka baxa adiga, iyo naagtaada, iyo wiilashaada, iyo naagaha wiilashaada e kula jiraba.

17-Soo bixi wax kasta oo nool oo kula jooga, inta jidhka leh

oo dhan, kuwaas oo ah haadda, iyo xoolaha, iyo waxa dhulka gurguurta oodhan; si ay dhulka ugu bataan, oo ay wax badan u dhalaan, oo ay dhulka ugu tarmaan.

18-Nuuxna wuu baxay, isagii iyo wiilashiisii, iyo naagtiisii, iiyo naagihii wiilashiisa ee la jirayba.

19-Dugaag kasta, iyo wax kasta oo gurguurta, iyo haad kasta, iyo wax alla wixiid hulka ku dhaqdhaqaaqaba, jinsigoodii ayay doonnidii kala soo baxeen.

-Ilaah wuxuu xusuustay Nuux iyo qoyskiisii oo ku jiray doonnida.

-Ilaah wuxuu joojiyey roobkii, wuxuuna soo diray dabayl dhulka qalajisa.

-Dadka qaarkii ayaa waxay rumaysan y ihiin in jinniyo maamulaan dabaylaha iyo roobka.

-Taasina waa been.
-Ilaah oo keliya ayaa sameeyey dabaysha iyo roobka.

-Ilaah oo kaleiya ayaa wuxuua haa kan dabaylaha iyo roobabka haga.

-Ilaah wuxuu daafacay Nuux iyo qoyskiisii ku jiray doonnida.
-Ilaah wuxuu kaloo daafacay xayawaanka doonnida ku jira oo dhan.

-Miyaa mid ka mid ah kuwii doonnida ku jiray dhintay?
-Maya.
-Ilaah wuxuu leeyahay waxaan badbaadinayaa Nuux iyo qoyskiisa.

-Ilaah wuxuu mar waliba badbaadiyaa wax waliba ee uu yiraahdo



waan samaynayaa.

-Muxuu Nuux sameeyey kaddib markii uu doonnida ka degay?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 8:20-22

20-Nuuxna meel allabari buu Rabbiga u dhisay; xayawaankii daahirka ahaa iyo haaddii daahirka ahaydba, intuu wax ka qaatay ayuu allabaryo la gubo ku bixiyey meeshii allabbariga dusheeda.

21-Rabbiguna wuxuu uriyey caraftii udgoonayd, kolkaasuu Rabbigu iska yidhi qalbigiisa, mar dambe dadka aawadiis dhulka uma habaari doono, maxaa yeelay, malaha qalbiga dadku waa shar tan iyo yaraantiisa; mar dambena ma aan dili doono wax kasta oo nool sidii aan yeelay.

22-Intuu dhulku jiro, beer abuurid, iyo beer goosasho, iyo qabow iyo kulayl, iyo gu iyo jiilaal, iyo habeen iyo maalin midnaba ma joogsan doono.

-Maaddaama Nuux ku faraxsanaa in Ilaah badbaadiyey Isaga, Nuux allabbari buu Ilaah u keenay.

-Maxaa Ilaah u aqbalay allabarigii Nuux?
-Waayo Nuux wuxuu rumaystay Ilaah.

-Waayo Nuux wuxuu ka soo jeestay dariiqiisii sharka ahaa, oo wuxuu soo raacay dariiqa Rabbiga.

-Miyaa dhiigga xayawaanku bixiyey dembigii Nuux.
-Maya.

-Dhiigga wuxuu baray Nuux in ciqaabta dembigu tahay

dhimashada daa'imka ah.

-Maxaa Ilaah Nuux ku yiri kaddib markii Nuux Ilaah qurbaan u keenay?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 9:1-3

1-Oo Ilaah waa barakadeeyey Nuux iyo wiilashiisii, oo wuxuu ku yidhi, Wax badan dhala, oo tarma, oo dhulka ka buuxsama.

2-Cabsidiinna iyo baqdintiinnu way la jiri doonaan dugaag kasta, iyo haad kasta oo hawada, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan, iyo kalluunka badda oo dhan, gacmihiinna baa laydiin geliyey iyaga.

3-Wax kasta oo dhaqdhaqaaqa oo noolu cuntay idiin noqon doonaan; sidii aan geedaha cagaarka ah idiin siiyey ayaan kulli idiin siiyey.

-Ilaah wuxuu barakadeeyey Nuux iyo qoyskiisii.

-Ilaah wuxuu Nuux ka dhigay iyo dadka oo dhan inay u taliyaan xayawaanka oo dhan, shimbiraha, iyo kalluunka.

-Waxaa kaloo Ilaah siiyey Nuux calaamad.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 9:8 & 11-13

8-Oo Ilaah Nuux buu la hadlay, iyo wiilashiisii.

11-Oo waxaan idinku adkayn doonaa axdigayga; inta jidh leh oo dhan mar dambe biyo daad ah laguma baabi'in doono; daad dambe ood hulka baabi'iyaana mar dambe ma jiri doono.

12-Oo Ilaah wuxuu yidhi, Waa tan calaamadii axdiga aan



idinla dhigianayo idinka iyo uun kasta oo nool oo idinla jooga, tan iyo qarni kasta.

13-Waxaan qaansadayda ku dhex dhigay daruurta, waxayna noqon doontaa calaamadii axdiga dhex yaal aniga iyo dhulka.

-Waa maxay calaamadda Ilaah siiyey Nuux iyo dadka ood han?
-Qaansa-roobaadka.

-Maxay calaamadda qaansa-roobaadku ka macne tahay?

-Qaansa-roobaadku waxay ka macen tahay inaanu Ilaah kol dambeeto ku burburinaynin dhulka daad.

-Miyaa Ilaah haddaba adkeeyey axdigiisii ahaa inaanu dunida ku burburinaynin Daad?
-Haa.

-Ilaa iyo wakhtigii Nuux Ilaah dunida iyo wax waliba ee ku dhex jiraaba kuma halaagin daad.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 9:18-19

18-Oo wiilashii Nuux oo doonnidii ka soo baxay, waxay ahaayeen Sheem, iyo Xaam, iyo yaafet, Xaamna waa kancaan aabbihiis.

19-Saddexdanu waxay ahaayeen wiilashii Nuux; oo iyagii farcankoodii baa dhulka oo dhan ku fiday.

-Yey ahaayeen wiilashii Nuux, oo lagu sheegay inay ahaayeen aabbayaasha dadka dunida oo dhan?

-Waa Saam, iyo Xaam, iyo Yafaet.